



# ICRCda 00 SHAQAYNAYSA

SI KOOBAN

ICRC



ICRC

## ANNAGU CIDDA AAN NAHAY:

Muddo 150-sano ka badan ayaa Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas (ICRC) wuxuu kaalmaynaayey dadka dunida ku dhaqan ee colaadda hubaysan iyo gacanka-hadalka kaleba ay saameyeen. Annaga oo ah urur aadminnimo oo madax bannaan, waxaan samaynaa wax kasta oo aan kari karno si aan u dhawrno dadka sharaftooda, isla markaasna dhibaatada haysata aan u yarayno, annaga oo inta badan la shaqaynayna hey'adaha iskaashiga sida Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas.

Waxaannu isku hawlnaa ka hortagga darxumada, annaga oo u marayna baahinta iyo xoojinta xeerka caalamiga ah ee aaddminnimada (xeerka colaadda hubaysan), iyo u halgaminaynaa mabaadi'da caalamiga ah ee aaddminnimada. Annaga oo aqoon ballaaran u leenahay xeerarkaan isku-xiranta ah, waxaan nahay xoogga dhaqaajinaya Heshiisyadii Jineefa ee 1949kii.



Anisa Hussien/CIC

## WAXA AAN QABANNO

- Wuxaan ku dedaalnaa inaan hubinno rayadka aan colaadaha qaybta ka ahayn in aan ka ilaalinno dhibaato soo gaadha
- Wuxaan bixinnaa cuntada degdeffa loogu baahan yahay, biyaha nadiifka ah, fayo-dhawrka iyo hooyga
- Wuxaan booqanna maxaabbiista dagaalka iyo kuwa nabadgelyada awgeed loo hayo, si aan u hubinno inay haystaan xaalado nololeed oo la aqabali karo, isla markaasna si sharaf leh loola dhaqmo
- Wuxaan mar kale xiriirinnaa xubnaha qoysaska colaadda hubaysan ku kala firdhay, ama haajaray
- Wuxaan bixinnaa ama fududaynaa sidii dadka u baahani ay ku heli lahaayeen adeegyada asaasiga ah ee daryeelka caafimaadka
- Wuxaan bulshooyinka ka kaalmaynaa sidii ay u soo kaban lahaayeen, waxaannuna siinnaa waxyaabihii ay noloshooda dib ugu dhisi lahaayeen
- Wuxaan dhinacyada ay colaaddu ka dhexayso dhammaantood ku war-gelinnaa waajibaadka ka saaran xeerka caalamiga ah ee aadminnimada
- Wuxaan indhaha ku haynaa sida loogu dhaqmo xeerka caalamiga ah ee aadminnimo, isla markaasna horumarintiisa ayaan gacan ka geysanna



- Wuxaan yaraynaa halista ka imaan karta miinooyinka dhulka lagu aasay ee weli ku jirta iyo saanadda aan qarxin
- Wuxaan caawinnaa Ururrada Qarameed ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas, si colaadda hubaysan iyo gacanka-hadalka kaleba ay ugu diyaar-garoobaan, ugana jawaabaanan.

## MEELAHA AAN KA SHAQAYNO

Waxay shaqaalaheena ka hawl-galaan 180 dal. Waxaa suuraggal ah inay joogaan goobta shaqada, iyaga oo gargaar degdeg ah u fidinaya dadka u baahan, inay ka shaqaynayaan gobollada meelo ka mid ah, ayna ka hayaan hawlaho isku-dubbe-ridka iyo qaybinta gargaarka ama inay ku sugari yihii magaaloooyinka waaweyn, halkaas oo ay ka fulinayaan hawlo aadminnimo oo diblomaasiyed.

Inta badan xubnaha shaqaalaheena oo 16,000 gaarayaan waxay joogaan goobta shaqada. Waxaa kaloo shaqaale noo joogaa xarunteena dhexe magaalada Jineefa ee dalka Iswiiska, taas oo na siisa taageero wax-ku-ool ah, hawgaladeena kormeer ku samaysa.



ICRC

## SIDA AAN U SHAQAYNO

Afar mabda' oo waaweyn ayaannu ku fulinnaa xilkeena aadminnimo: aadminnimo, eex la'aan, madaxbannaani iyo dhexdhedaadnimo. Sababta aan dhibaatada dadka uga miciinna (relieve) waa baahida haysa oo keliya, sidaas daraaddeed ma danayno isirkooda, jinsigooda, siyaasadda amaba diintooda. Maadaama aan nahay hay'ad madaxbanaan iyo dhexdheaad ah, waxaan tagi karnaa meelaha hay'ado badan tagi karin - nafta aadanaha ayaan ku badbaadinnaa aagagga dagaalka aan la gaari karin una halista bada.



ICRC



Mohamed Bishar/SRCS

1863kii ayaa ICRCda la asaasay, waana xubnaha abaabulay Dhaqdhaqaqa Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Waxaan si dhow ula hawl-galnaa ururrada ay wada-shaqayntu naga dhexayso ee Dhaqdhaqaqa nagula jira sida Xiriirka Caalamiga ee Ururrada Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas iyo, sidoo kale, Ururrada Qarameed ee Laanqayrta cas iyo Bisha Cas kuwaas oo 190 dal oo dunida ku kala baahsan oo hawlo aadminnimo ka fuliya.

Booqo bartayada internetka: [www.icrc.org](http://www.icrc.org).

La xiriir ergada ICRCda ee kuugu dhow ama Laanqayrta Cas ama Bisha Cas laamahooda maxalliga ah ee kuu dhow.

- [facebook.com/icrc](https://facebook.com/icrc)
- [twitter.com/icrc\\_Africa](https://twitter.com/icrc_Africa)
- [www.instagram.com/icrc\\_afrique](https://www.instagram.com/icrc_afrique)
- <https://blogs.icrc.org/somalia/>

Ergada ICRC Soomaalyia  
Wadada Denis Pritt  
S.B.73226-00200  
Nayroobi, Kenya  
© ICRC, Setembar 2019

**ICRC**